

Xeer M. J. - 28 December 1963, lamba. 5.

Hay'adaha kala duwan ee xisaabaadka guud ee gobollada dalka.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda

Markuu arkay qodobbada 81, 2aad, iyo 85 ee Dastuurka;

Markuu arkay qodobbada 16 iyo 23 ee Sharciga 3 Juun 1962, lamba. 14 oo ku saabsan Nidaamka Dowladda

Markuu afkay qod. 29, cutubka 2, ee Xeer-Sharci 29 Decembar 1961, lamba. 2 ee Nidaamka Xisaabaadka Maamulka;

Markuu tixgeliyay baahida loo qabo in la sameeyo qaybo ka go'an xafiiska xisaabaadka guud ee gobollada si loo fududeeyo xakamaynta dakhliga iyo kharashaadka;

Markuu Dhageestay Golaha Wasiirada;

Markuu arkay soo jeedinta Wasiirka Maaliyadda, oo heshiis la ah Wasiirka Arrimaha Gudaha;

Wuxuu Xeeriyay

Qod. 1

Qaybaha Xisaabaadka ee Gobollada

Laga bilaabo 1 Janaayo 1964, waxaa laga sameeyay Gobollada qayb gaar ah oo ka mid ah xisaabaadka guud oo xarunteedu tahay Gobolka. Qayb kasta oo ka mid ahna waxaa madax ka noqonayo qof wakiil ah Xisaabiyaha Guud.

Qod. 2

Hawlaha Wakiilka Xisaabaha Guud

Ergayga Xisaabaadka ayaa si kala sareyn ah ugu warbixiya Xafiiska Xisaabaadka Guud ee Gobolka.

Wakiilka Xisaabiyaha Guud waxaa uu ka hawlgalaa Gobollada, ka dib markii uu sidaas u soo xilsaarto Xisaabiyaha Guud, dhammaan ama qayb ka mid ah waajibaadka khuseeya Xisaabiyaha Guud, oo ku xusan ama uu dhigayo Nidaamka Xisaabaadka Maamulka oo ku qeexan Xeerka-Sharci 29.12.1961 lamba.. 2 iyo Xeerka Xisaabaadka Dawladda ee lagu ansixiyay P.R. ee 17 Decembar 1962, lamba. 317, iyo sidoo kale sharciyada kale ee mawduucan ku saabsan.

Qod. 3

Kharashka Miisaaniyadda

Kharashaadka la xiriiro hawl-galka qaybaha kala duwan ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Gobollada, waxaa sanooyinka soo socdo laga bixin doonaa Ciwaanka iyo Cutubyada u dhigma Ciwaanka II cutubyada 1, 2, 3 iyo 9 ee Miisaaniyadda caadiga ah ee 1963.

Qod. 4

Xeerkan ayaa lagu soo daabici doonaa Faafinta rasmiga ah, waxaana lagu dari doonaa Ururinta Rasmiga ah ee Sharciyada iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Cid kasta oo mas'uul ah waxa ku waajib ah in ay ilaaliso oo ay ku ilaaliso sida sharciyada dalka.

Muqdisho, 28 Desember 1963.

Aden Abdulla Osman

Ra'iisul wasaaraha

Cabdiradhiid Cali Shermarke

Wasiirka Arrimaha Gudaha

Maxamuud Cabdi Nuur

Wasiirka Maaliyadda

Abdulcadir Mohamed Aden

Arkay oo ku diiwaan gashan - Reg. lamba. 3, xaashida lamba. 207.

Muqdisho, Decembar 30, 1963.

Hantidhowraha Guud: **Mohamed Omar**